# Oggolaansha Baadhitaanka Karoone (COVID-19)

Concentric by Ginkgo adeega ay bixiso Ginkgo Bioworks, Inc. ("Concentric"), waxay siinaysaa barmaamijyo baadhitaanka Karoone (COVID-19) ah qaab baadhitaan kooxeed "pooled testing" ah iyo/ama baadhitaano gaar ah "diagnostic tests" dugsiyadda iyo haayaddaha ("barmaamij"). Baadhitaano kooxeedka lagu bixinaayo barmaamijkan waxaa lagu xaqiijiyey iyadoo la isticmaalaayo talooyinkii FDA. Waxay muujinaysaa haddii mid ka mid ah kooxdu wuu buko. Haseyeeshee, baadhitaanku gaar uma muujinaayo qofka kooxda ah ee buka. Baadhitaanada gaarka ah ayaa tusinaaya haddii qof gaar ahi uu buko. Baadhitaanadda gaarka ah waxaa lagu bixinayaa a barmaamij ay FDA ogolaatay waxaana kujira baadhitaanadda deg dega ah ee muujinaaya haddi uu jidhkaaga fayriska karoone kujiro (antigen tests and PCR/molecular tests).

**Ka-qayb-gale kasta waxaa kuwaajiba inuu akhriyo isla markaana saxeexo foomkan ka hor intaanu ka qayb qaadan barmaamijka.** Haddii uu ka-qayb-galuhu ka yaryahay 18 jir ("Ilmo-yar"), waalidka ama masuulka sharciga ahi waa inuu akhriyaa isla markaana saxeexaa foomkan isagoo matalaaya ilmaha yar intaanu ilmuhu ka qayb gelin barmaamijka.

**<u>Qodobada ugu mudan ee ogolaanshuhu waa:</u>**

- Sida baadhitaanada karoone (COVID-19 tests) badankooda, baadhitaano kooxeedka iyo ka gaarka ah ee loo adeegsanaayo barmaamijkan midkoodna FDA may ansixin. (Ogow: Kelmadda "ansixin" macnaheedu waa shay aad u kooban marka la eego aragtida FDA. Horaantii sanadka 2021, wax baadhitaan karoone ah (COVID-19) FDA may ansixin.)

- Baadhitaano kooxeedku ma siinayaan natiijo gaar ah qof kasta oo kooxda kujira. Haseyeeshee, haddii natiijo inuu xanuunku jiro ah laga helo baadhitaanka kooxda, dhammaan dadka kujira kooxdaa waa la ogaysiinayaa

- baadhitaano shaqsi oo gaar ah ayaa la isticmaali karaa "baadhitaano dabo-gal ah" haddii baadhitaanka kooxdu soo saaro natiijo ah inuu xanuunka jiro. Sidoo kale iyaguna iskood ayay u isticmaali karaan. Dugsiga ama haayadda ku bixinaysa baadhitaanka barmaamijkan dhexdiida waxay go'aamin doontaa goorta iyo sida baadhitaanka gaarka loo isticmaali doono.

- Maadaama baadhitaanada gaarka ahi ay bixinayaan natiijooyin shaqsi ah, qof kastaa waa la ogaysiin doonaa natiijo kasta oo kasoo baxda baadhitaanka gaarka ah ee isagu/iyadu/iyagu ay sameeyaan.

- Waad ka noqon kartaa ogolaanshahaaga waqti kasta.

- Halisaha ka iman kara ururinta muunadda waxa kujira waxoogaa xanuun ah.

**Fadlan si taxadir leh u akhri una saxeex ogolaanshahan soo socda**

Ogolaanshaha oo dhan, "adiga" iyo "waxaaga" waa loo tixgelinayaa shaqsiga warbixintiisa iyo muunadiisu/muunadihiisu baadhitaanka la keenay iyo qofka qaadanaaya adeegyadda maadaama barmaamijkan dhexdiisa lagu bixin karo ("Qataha Baadhitaanka"). **Markaad saxeexdo ogolaanshahan, waxaad xaqiijinaysaa inaad tahay baadhitaan qaate ama waalidkii ku haboonaa, masuulkii, ama qofkii shariciyan loo ogolaa inuu bixiyo ogolaanshaha Canugaha Qataha Baadhitaanka ah ee magaciisu hoos ku qoranyahay iyo:**

A. Inaad ogolaatay ururinta iyo baadhitaanka kooxda ee Karoone (COVID-19) iyo/ama baadhitaannadda shaqsiga ah ee gaarka ah marka uu dalbado haayadda Baadhitaanka Qaadanaysa ama dugsiga Baadhitaanka Qaadanaaya (kujira baadhitaanadda deg dega ah ee muujinaaya haddi uu jidhkaaga fayriska karoone kujiro (antigen tests and PCR/molecular tests). Inaad fahansantay in dhammaan noocyada muunadu noqon doonaan qaar aan waxyeelo lahayn, suufyaroo gaaban oo sanka layska gelinaayo ama candhuuf. Halisaha ka imana ururinta muunadda waxa kujira waxoogaa xanuun ah oo uu keenaayo suufka sanka layska gelinaayo. Cuncunku waxaa la filayaa inuu muddo gaabanyahay.

B. Inaad fahansantay in baadhitaano kooxeedka noocan ahi aan loo baahnayn inay ansixiyaan ama ogolaadaan U.S. Food & Drug Administration (FDA), iyo inaad fahansantay in baadhitaano kooxeedku aanay ahayn in FDA ansixiso ama baadhitaan la ogolaaday iyo baadhitaan caafimaad oo gaar ah toona. Waa inaad fahansantay in baadhitaanada shaqsi ee gaarka ahi ee ay bixiso Concentric ay yihiin qaar FDA ku ogolaaltay ogolaanshaha isticmaalka deg dega ah.

C. Inaad fahansantay in baadhitaan kooxeedku aanu ukeenay natiijooyin shaqsi ah xubin kasta oo kooxda ah, iyo in natiijooyinka Qaataha Baadhitaanka natiijooyinka shaqsiga ah ee kujira baadhitaanka kooxda aan lagula wadaagi karin. Inaad fahansantay haayada qaadanaysa baadhitaanku ama dugsigu ay heli karaan natiijooyinka baadhitaan walba.

D. Inaad fahansantay in lagu ogaysiin doono natiijooyinka baadhitaanada gaarka ah ee shaqsiga ah Baadhitaanka Qaadanaaya muujinaaya haddi uu jidhkaaga fayriska karoone kujiro ee PCR ama molecular tests.

E. Inaad fahansantay in, sida baadhitaanka kasta oo karoone ah (COVID-19), waxaa jiri kara suurtogalnimada natiijo been ah oo sheegaysa inuu ku hayo xanuunka Karoone (COVID-19) ama inaanu ku hayn xanuunka COVID-19 natiijada baadhitaanka iyo in suurtogalnimada natiijada baadhitaanka Karoone (COVID-19) oo khaldani ka sarayn karaan baadhitaan kooxeedka marka la barbar dhigo baadhinka shaqsiga ah.

F. Inaad fahansantay in Concentric iyo dugsiga ama Haayadda Qaataha Baadhitaanku midkoodna aanu matali karin sidii bixiye Qaataha Baadhitaan caafimaad, baadhitaankani ma bedelaayo dawayntii bixiye Qaataha Baadhitaan caafimaad, iyo inaad u malayso masuuliyad buuxda oo dhammaystiran oo ah inaad qaadato falcelinta ku haboon ee khusaysa natiijooyinka baadhitaanka Qaataha Baadhitaan. Ma samayn doontid wax doorasho caafimaad ah adiga oo aan la tashan bixiye adeeg caafimaad ama aan tixgelin talada caafimaad eek a timid bixiyaha adeega caafimaad ama dib u dhigin raadinta taladan ku salaysan natiijooyinka baadhitaanka aad ka heshay baadhitaan kooxeedka ama shaqsiga.

G. Inaad fahansantay in aad bedeli karto maskaxdaada ama ka noqon kartid ogolaanshahan waqti kasta, laakiin ka noqoshadani waa mid la sugaayo oo keliya, mana saamayn doonto macluumaadka aad hore u ogolaatay in la baahiyo. Si aad uga noqoto ogolaanshahan baadhitaanka karoone (COVID-19), la xidhiidh Dugsiga ama Haayada Qaataha Baadhitaanka

H. Inaad fahansan tahay Concentric ay raadinayso noocyada fayraska koroone (COVID-19), sida baadhida isbedelada fayraska iyo inaad oggolaato habsocodka dheerigaa ee fayrasyada Concentric iyo il maqabatiga kale ee ku dhex nool muunada duruufaha caafimaad iyo sababaha caafimaadka bulshada.

Adiga, hoosta ka xariiqay, cadeeyey inaad akhriday macluumaad kor ku xusan kuna saabsan Barnaamijka, sharaxaada muunadaha baadhista ee la soo ururiyey, iyo dhibaatooyinka ka dhalan kara Barnaamijka, iyo inaad fahansantahay in macluumaadkani sidoo kale bixin karaan Concentric iyadoo lagu bixinayo codsi la siinayo haayadaha ama dugsiyada Qaata Baadhista. Xaalado iyo shuruudo dheeri ah, sharciyada gaarka ah ee Concentric, iyo sii daynta oggolaanshaha baadhista Concentric halkan ayaa laga heli karaa: https://www.concentricbyginkgo.com/consent. Waxaad si mutadawacnimo u aqbashay inaad ka qayb-qaadato (ama u oggolaato Cunuga inuu ka qayb-qaato) Barnaamijka.

Magaca Dugsiga/Haayada: _____

| **Haddii oggolaanshahan uu yahay kaagii maada aad tahay baadhista qaataha** | **Haddii oggolaanshahan ay tahay Cunuga**: |
|---|---|
| Magaca (Daabacan): _____ | Magaca Cunuga (daabacan): _____ |
| Saxeexa: _____ | Magaca Waalidka/Masuulka sharciga (daabacan):_____ |
| Taariikhda: _____ | Saxeexa Waalidka/Masuulka sharciga: _____ |
| | Taariikhda: _____ |

# Macluumaadka Baadhitaan Qaataha ee COVID-19

Magaca Dugsiga ama Haayada: _____

Magaca Baadhitaan Qaataha / Cunuga: _____
Hore Danbe

Magaca Masuulka (haddii ay ku haboontahay): _____
Hore Danbe

Macluumaadka Baadhitaan Qaataha /Cunaga:

_____
Taariikhda dhalashada (Bisha Maalinta Sanadka) Talefoon lambarka (1-###-###-####)

_____
Cinwaanka Waddada, P.O. Box Guryaha la deganyahay, Sakad, Qaybta, Dhismaha, Dabaqa

_____
Magaalada Gobolka Koodhka ZIP

Tilmaam adigoo goobaabaya hal doorasho ee kuwan soo socda kaasoo qeexaya baadhitaan qaataha ama cunuga:

**Sinji**: Dhedig Lab Kuwa kale Doorbidaya inaan la sheegin

**Qoomiyada**: Hispanic ama Latino aan ahayn Hispanic ama Latino Kuwo kale Doorbidaya inaan laga jawaabin

**Isir**: American Indian ama Dhalad Alaska Asian Madow ama African American
Dhalad Hawaiian ama Kuwa kale Pacific Islander Cadaan Laba ama isiro kabadan
Kuwo kale Doorbidaya inaan laga jawaabin